


Tababarka Tilmaanta iPad-ka



Somali


Guudmarka iPad-ka

iPad-kaagu wuxuu ku imaanayaa oo la socota warqad macluumaad wadata oo ka socota Apple oo ku jirta sanduuq/baakad. Tilmaamaha Isticmaalaha oo buuxa ee Apple ayaa laga helayaa internet-ka support.apple.com Tilmaamahan aad akhrinayso waxay leeyihiin macluumaad isku mid ah laakiin qaab fudud ah. Waxaa sidoo kale ku jira macluumaad dheeraad ah oo laga yaabo in aad u aragto in ay waxtar leeyihiin. OGOW: Haddii aad aragto ereyo ama erey bixin ku jirta Tababarkan Tilmaanta iPad-ka oo aadan garanayn, fadlan fiiri bogga u dambeeya ee wata liiska *Sharaxaadaha Ereyada iPad-ka*.

Badhanada/Meelaha wax isku xira 'Ports':




Sida loo buuxiyo baateriga iPad-ka:



Halkan waxaa ku qoran guudmarka fiidiyow 35-daqiqo oo ah muhiim u ah iPad-ka qaarkood oo ku jira YouTube: <https://bit.ly/iPad-Basics>

Sida loo dejiyo iPad-kaaga

1. **Daar:** Cadaadi oo hay badhanka laga daaro iPad-ka ilaa aad ka aragto astaanta Apple.
2. **Marka xigta:** Waxaad arki doontaa "Hello" oo ku qoran luqaddo badan. Raac tallaabooyinka ku qoran shaashada si aad u bilawdo. (Haddii aadan indho qabin ama araggaagu hooseeyo [Daar VoiceOver](#) ama [Zoom](#) ee ka socda shaashada Hello.) Marka lagu weydiiyo, dooro luqaddaada. Ka dibna taabo waddankaaga (US). Tani waxay saameynaysaa sida macluumaadku u eg yahay, oo ay ku jiraan taariikhda, waqtiga, dadka xiriirka lala leeyahay, iyo waxyaabo badan. Marka xiga, taabo badhanka buluuga ah ee gelida si aad [u dejiyo Kala doorashooyinka Gelida 'Accessibility Options'](#) oo gacan ka geysan kara wanaajinta waayo-aragnimadaada wax dejinta/rakibida iyo isticmaalka iPad-kaaga cusub.




Taabo Gacan ahaan u Deji "[Set Up Manually](#)" ee ku taala halka hoose ee shaashada si aad u sii wado.

3. **Ka shaqeysii:** Waxaad u baahan tahay nidaamka Wi-Fi, nidaamka telefoonka gacanta, ama iTunes si aad uga shaqeysiiso oo aad u sii wado dejinta aaladaada. Taabo nidaamka Wi-Fi ee aad rabto in aad isticmaasho ama dooro mid kale oo la kala dooranayo.



4. **Deji Taabashada Aqoonsiga 'Touch ID':** Qaabkani, waxaad isticmaali kartaa farahaaga si aad u furto aaladaada oo aad wax u gadato. Taabo Sii wad 'Continue' oo raac tilmaamaha, ama taabo Mar dambe Deji Meesha wax laga maamulo "Set Up Later in Settings."
5. **Samee Passcode:** Deji passcode ka kooban lix lambar si uu gacan uga geysto ilaalinta xogtaada. Waxaad u baahan tahay passcode si aad u siticmaalo qaababka sida Taabashada Aqoonsiga 'Touch ID' iyo [Apple Pay](#). Haddii aad jeclaan lahayd passcode ka kooban afar lambar, passcode gaar ah, ama passcode la'aan, taabo Kala doorashooyinka Passcode-ka "Passcode Options."



6. **Gal adiga oo isticmaalaya Aqoonsiga Apple ID:** Gali Aqoonsigaaga Apple ID ama password-kaaga, ama taabo Waad ilawday miyaa password-ka ama ma haysatid miyaa Aqoonsiga Apple "Forgot password or don't have an Apple ID?" Halkaasi, ayaad ka soo ceshan kartaa Aqoonsiga Apple, ama dejin kartaa waqti dambe. Haddii aad isticmaasho wax ka badan hal Aqoonsiga Apple ah, taabo Isticmaal Aqoonsiga Apple oo kale oo gooni ah oo loogu talagalay iCloud iyo iTunes "Use different Apple IDs for iCloud and iTunes?" Marka aad gasho Aqoonsigaaga Apple, waxaa dhici karta in lagu tilmaamo astaanta xaqiijinta oo ka socota aaladaadii hore.




7. **Daar cusbooneysiinta tooska ah oo deji qaababka kale:** Shaashadaha xiga, waxaad go'aansan kartaa in aad [macluumaadka la wadaagto](#) horumariyayaasha app-ka iyo in aad iOS u oggolaato in ay si toos ah isku cusbooneysiiso.



8. **Waxaad dejisaa Siri iyo adeegyada kale:** Waxaa lagaa codsan doonaa in aad dejiso ama ka shaqeysiiso adeegyada iyo qaababka, sida Sri. Waxaa lagaa codsan doonaa in aad ku hadasho weedho dhowr ah si ay Sri u aqoonsan karto codkaaga. Haddii aad gasho Aqoonsigaaga Apple ID oo aan jeclaan lahayd in aad dejiso [Apple Pay](#) la kala dooranayo iyo [iCloud Keychain](#), raac tallaabooyinkan ku jira iPad-ka.



9. **Waxaad dejisaa Waqtiga Shaashada iyo kala doorashada muuqaalo badan:** [Waqtiga Shaashadu](#) wuxuu ku siinayaa aragti ah inta uu le'eg yahay waqtiga adiga iyo/ama carruurtaadu aad ku qaadanaysaan aaladihiina. Wuxuu sidoo kale kuu saamaxaa dejinta waqtiyo xaddidan oo loogu talagalay isticmaalka maalin kasta ee app-ka. Ka dib marka aad dejiso Waqtiga Shaashada, waxaad isticmaali kartaa Display Zoom si aad cabbirka astaamaha 'icons' iyo qoraalka u waafajiso shaashadaada Muhiimka ah.



10. **Dhammeystir:** Taabo Bilaw "Get Started" si aad u bilawdo isticmaalka iPad-kaaga. Waxaad sameysaa nuqulka xogtaada oo ammaan ah adiga oo [keydinaya/koobi gareynaya](#), waxaanad ogaataa qaabab badan oo ku jira tilmaamaha isticmaalaha ee la soo raaciyay sanduuqaaga/baakadaada iPad-ka.
11. **Buuxi baateriga iPad-ka:** Marka astaanta baaterigu hoos u dhacdo, ku xir buuxiyahaaga baateriga. Waad ogtahay in baateriga uu buuxinayo iPad-ka marka astaanta baaterigu leedahay calaamada biriqda/danabka 'lightning bolt' oo kale.



12. **Waxaad damisaa iPad-ka:** Cadaadi oo hay badhanka **Daarista/Daminta/Seexinta** ee ku yaala dhinaca geesta midig ee sare ee iPad-ka. Waxaad sii wadaa in aad gacanta ku sii hayso badhanka ilaa meesha hadba dhinac loo dhaqaajiyo 'slider' ay ka soo muuqanayso shaashada. Dhaqaaji **Meesha hadba dhinac loo dhaqaajiyo si aad u damiso** adiga oo u dhaqaajinaya dhanka midigta.

Xusuusnow, macluumaadkani iyo waxyaabo dheeraad ah ayaa ku jira boggeena
Ka mid noqoshada Dhijitalka:



Meesha laga maamulo iPad-ka

App-ka Wax laga maamulo wuxuu ku yaalaa shaashada Muhiimka ah 'Home screen'. Wuxuu ka kooban yahay liisas la kala dooranayo oo qabta waxyaabo badan:


- Beddelaada sida uu u shaqeeyo kambiyuutarkaaga gacantu 'tablet'
- Maareynta Aqoonsigaaga Apple ID iyo isku diiwaan gelinta App

Store

- Joojinta waxyaabaha qaarkood
- La socodka iyo maamulka sida adiga iyo/ama qoyskaagu u

isticmaashaan aalada


- Dejinta ogeysiisyada, asturnaanta, iyo password-ka
- Daminta/daarista Wi-Fi
- Dejinta sawirka gadaasha ku yaala ee shaashada "wallpaper"
- Beddelaada iftiinka shaashada
- iyo waxyaabo intaa AAD uga badan!





Meesha laga maamulo Gelida

iPad-ku wuxuu leeyahay qaabab badan oo gelid si ay u taageeraan aragga, jirka iyo socodka, maqalka, iyo baahiyaha iyo waxyaabaha la doorbidayo ee dhanka waxbarashada. Booqo Meesha wax laga maamulo 'Settings', ka dibna raadi astaanta Gelida:



Ka dibna dooro mid kasta oo ka mid ah qaababka soo socda. Tilmaamo gaar ah iyo fiidiyowyo/meelaha laga sii gelayo oo loogu talagalay mid kasta oo ka mid ah kuwaani waxaa laga helayaa internet-ka ee boggeena Ka mid noqoshada Dhijitalka

www.cv-atlab.org/digital-inclusion



Aragga	Jirka & Socda	Maqalka
Codka	Taabashada	Qalabka Maqalka
Zoom	Aqoonsiga Wajiga & Feejignaanta	Aqoonsiga Codka
Weyneeyaha 'Magnifier'	Kaantaroolka Qalabka	RTT/TYY
Muuujinta & Cabbirka Qoraalka	Kaantaroolka Codka	Maqalka iyo Muuqaalka
Socodka	Badhanka Muhiimka ah ama Sare	Qoraalada hoose & Hadalka qoraalka ah
Waxyaabaha Laga Hadlo	Meel fog Ka gelida Apple TV	Guud
Sharraxaada Maqalka	Kaantaroolka Wax tilmaamaha	Gelitaanka La Hagayo
	Keyboard-yada	Siri
	Qallinka Apple	Meel gaaban Ka gelida 'Shortcut'



Dejinta Email-ka

Haddii aad isticmaasho bixiyaha email-ka sida Google, ama Outlook, Meesha laga maamulo Mail-ka ayaa si toos ah u sameyn karta koontadaada email-ka iyada oo la isticmaalayo cinwaankaaga email-ka iyo password-ka:

1. Waxaad aadaa Meesha wax laga maamulo 'Settings'  > hoos u raac **Mail-ka** > ka dibna taabo Koontooyinka '**Accounts**'.
2. Taabo Ku dar Koonto '**Add Account**', ka dibna dooro bixiyahaaga email-ka. (Haddii aadan arag bixiyaha email-kaaga, taabo Kuwa kale '**Other**' si aad koontadaada ugu darto gacan ahaan.)
3. Gali cinwaankaaga email-ka iyo password-ka.
4. Taabo Mida xigta '**Next**' oo sug in Mail-ku xaqiijiyo koontadaada.
5. Macluumaad ka soo dooro koontadaada email-ka, sida Dadka xiriirka lala leeyahay 'Contacts' ama Kaalandarada 'Calendars'.
6. Taabo Keydso '**Save**'.






Dejinta FaceTime

App-ka FaceTime gudihiisa, waxaad sameyn kartaa fiidiyow ama wicitaanada dhanka maqalka ah oo loo dirayo asxaabta iyo qoyska. Isticmaalka kaamarada hore, waxaad u hadli kartaa si waji-waji ah. U beddelo kaamarada dambe si aad ula wadaagto waxa aad aragto hareerahaaga.

1. Waxaad aadaa Meesha wax laga maamulo 'Settings'  > FaceTime, ka dibna daar FaceTime.
2. Haddii aad rabto in aad awoodo qaadista Sawirro Toos ah inta lagu jiro wicitaanada FaceTime, daar Sawirrada Tooska ee FaceTime.
3. Waxaad galisaa lambarkaaga telefoonka, Aqoonsigaaga Apple ID, ama cinwaankaaga email-ka si aad u isticmaasho FaceTime.





Ammaanka Online-ka/Internet-ka

Waxaa jira meelaha internet-ka laga gelo 'internet browsers' oo dhowr ah oo aad ka isticmaali karto iPad-ka. iPad-ku wuxuu ku yimaadaa oo la socda nidaamka Safari oo hore loogu sii rakibay (astaanta jiheeye buluug ah oo kor ku yaala). Meesha laga gelo internet-ka oo kasta oo aad jeceshahay, halkan waxaa ku qoran 10 talooyin oo ku saabsan ammaanka internet-ka:

1. Haddii isticmaalka internet-ku kugu cusub yahay, weydiiso qof aad ku kalsoon tahay in uu ku caawiyo.
2. Tirtir dalabyada email-ka ee u muuqda 'kuwa aan la rumeysan karin' (khiyaanada macluumaadka sida sharci darrada ah lagu helayo.)
3. Macluumaadka shakhsiyeed ha ku wadaagin internet-ka.
4. Akhri oo faham meesha laga maamulo asturnaanta iyo siyaasadaha asturnaanta ee app-ka.
5. Marnaba ha wadaagin password-yadaada (ka dhig kuwo gaar ah/la wadaag dadka aad ku kalsoon tahay oo kaliya).
6. Ka fikir ka hor inta aadan wax dhihin internet-ka. Waxaa lala wadaagi karaa dad badan.
7. Haddii qof internet-ka ka dhaho wax kaa caraysiiya, u sheeg qof aad ku kalsoon tahay.
8. Ha soo dejin ama ha riixin meelo la sii gelayo adiga oo og in la rumeysan karo maahane.
9. Marka aad isticmaalayo Wi-Fi dadweynaha (sida marka la joogo dukaanka bunka) website-ka ha gelin macluumaadka gaar ahaaneed ama dhaqaale.
10. Software-kaaga ka dhig mid la cusbooneysiisay.

Wixii macluumaad dheeraad ee ku saabsan ammaanka internet-ka, booqo:

www.usa.gov/online-safety

Xusuusnow, macluumaadkani iyo waxyaabo dheeraad ah ayaa ku jira boggeena Ka mid noqoshada Dhijitalka:

cv-atlab.org/Digital-Inclusion

Sharraxaadaha Ereyada iPad-ka

App: Oo loo soo gaabiyo “application.” Astaamaha ku yaala shaashadaada iPad-ka mid kasta wuxuu matalaa “app” ama barnaamij qabta shaqo gaar ah, sida email-ka, gelitaanka internet-ka ‘internet browsers’, iwm.

Aqoonsiga Apple ID: Oo ah magaca lagu gelayo ‘user name’ iyo password gaar ah oo la adeegsanayo cinwaankaaga email-ka iyo password-ka aad xulato. Wuxuu u baahan yahay in aad dejiyo iPad-kaaga iyo in aad soo dejiso app-ka, oo ay ku jiraan app lacag la’aan ah.

Bluetooth: Oo ah hab wireless ah oo loogu talagalay in ay qalabka ku xiraan iPad-ka, sida keyboard-yada, sameecadaha/codbaahiyayaasha, qallinka Apple, qalabka dhagaha la gashado, ama qalabka kale. Qalabka Bluetooth ayaa lagu xiri karaa iPad-kaaga taasi oo ah liiska Meesha wax laga maamulo ‘Settings’, ka dibna badhanka “Bluetooth” gudihiisa.

Halka la geliyo Qalabka dhagaha la gashado: Oo ah meel yar, oo furan oo wareegsan oo ku taala geesta bidix ee sare ee iPad-ka halkaasi oo xariga qalabka dhagaha la gashado kaga xirmo iPad-ka.

Badhanka Muhiimka ah ‘Home Button’: Oo ah badhan wareegsan oo le’eg lacagta kumiga ‘dime’ oo ku yaala xagga hoose ee bartamaha wajiga iPad-ka kaasi oo loo isticmaalo ka bixista shaashada aad ku jirto iyo ku soo noqoshada meesha muhiimka ah “home”- ee bogga halka app-ku ku yaalo. Waxaa sidoo kale la riixi karaa hal mar si ‘loo daaro/toosiyo ‘wake up’ iPad-ka marka ay shaashadu dansan tahay ama nasiino ku jirto ‘asleep’. Badhanka muhiimka ah ‘home button’ ayaa ah sidoo kale ah halka aad fartaada saari doonto marka aad isticmaasho Taabashada Aqoonsiga ‘Touch ID’ si aad u furto iPad-kaaga.

Meesha laga gelo Internet-ka/Web-ka: Oo ah barnaamij ama app kuu saamaxaya in aad wax ka raadiso ama isticmaasho internet-ka/web-ka. Meelaha internet-ka laga gelo ee inta badan la isticmaalo waa Safari, Google Chrome, iyo Firefox.

iOS: Nidaamka uu Ku shaqeeyo Apple ee loogu talagalay iPad-yada iyo iPhone-yada waxaa loogu yeeraa iOS. Nidaamka ay wax ku shaqeeyaan waa magaca loogu talagalay xirmada software ee ka shaqeysiiya kambiyyutarkaaga ama aaladaada, wuxuuna inta badan lambarro ku leeyahay dhanka dhammaadka kaasi uu kuu sheegaya nooca nidaamka aad isticmaalayso. Tusaale, nooca hadda jira ee iOS ee ugu badan waqtigan la joogo waa iOS 14.2. Waa in aad mararka qaarkood cusbooneysiisaa nidaamkaaga ay wax shaqeeyaan adiga oo ka cusbooneysiinaya liiska Meesha wax laga maamulo ‘Settings’ ee ka hooseysa “General.”

Meesha Baateriga Laga buuxiyo: Oo ah meel yar, oo furan oo fidsan oo ku taala oo geesta hoose ee bartamaha iPad-ka halkaasi oo xariga buuxinta baaterigu kaga xirmo iPad-ka.

Xariga Buuxinta Baateriga: Oo ah fiilo/xarig loo isticmaalo buuxinta baateriga iPad-ka ama ku xirma aaladaha kale sida kambiyyuurarka. Hal dhinac wuu yar yahay oo fidsan yahay

wuxuuna galaa meesha laga buuxiyo baateriga iPad-ka. Qaybta kale waa USB afar-gees leh oo weyn oo wax isku xira oo gala buuxiyaha baateriga ama meesha USB la galiyo ee ku yaala kambiyuutarka ama aalada kale.

Macluumaadka sida sharci darrada ah lagu helayo: Oo ah nooc khiyaano oo dhanka email-ka ama internet-ka ah. Khiyaanada macluumaadka sida sharci darrada ah lagu helayo 'phishing scam' badanaa waa meel la sii gelayo 'link' ama lifaaqa email ama bogga internet-ka oo xadi kara macluumaadkaaga isticmaalaha gaarka ah haddii la riixo/galo. Haddii aad email ka hesho qof aadan garanayn, ama email ka socda liis aadan xasuusan in aad isqortay, taxaddar samee. Ha riix/galin meelaha la sii gelayo 'links' oo kasta ama lifaaqyada u muuqda kuwo shaki leh.

Badhanka Wax laga daaro: Oo ah badhan fidsan oo afar-gees leh oo ku yaala geesta midig ee sare ee iPad-kaaga. Badhankani waxaa loo isticmaali karaa in laga daaro/damiyo iPad-kaaga, iyada oo hoos loo haynayo ilaa shaashadu ay ka muujinayso shaashada daarista/daminta. Hal riixid oo kaliya ayaa toosin/seexin/damin doonta shaashada iPad-kaaga.

Siri: Oo ah barnaamij ku jira iPad-kaaga halkaasi oo aad codkaaga u isticmaali karto in aad ku weydiiso su'aalo oo aad bixiso tilmaamo. Siri wuxuu heli karaa su'aalo dhanka afka wuxuuna qaban karaa ficilo ay ku jiraan furida app-ka, sameynta wicitaanada telefoonka, yeerinta/tilmaamida ama akhriska farriimaha qoraalka ah iyo email-ka, ama ka jawaabida su'aalaha internet-ka.

Taabashada Aqoonsiga 'Touch ID': Oo ah dejinta ammaanka Apple oo kuu saamaxaya in aad iPad-kaaga ku furto fartaada. Tilmaamaha dejinta ka fiiri halka sare. Ka dib marka aad dejiso iPad-kaaga, waxaad ku dari kartaa faro dheeraad haddii aad rabto.

Wi-Fi: (oo loo soo gaabiyo 'wireless fidelity') Oo ah adeeg la gato oo aaladaha sida iPad-yada, telefoonada casriga ah, kambiyuutarada, iyo daabacayaasha u oggolaada in ay galaan internet-ka iyo in midba midka kale la xiriiro marka lagu xiran yahay adeega/nidaamka Wi-Fi isku mid ah. Waxaad dejin kartaa Wi-Fi gurigaaga ama waxaad ka arki kartaa dukaanka bunka ama dukaanka weyn (sida dukaanka wax laga soo adeegto.)

Qiritaanka iyo Aqoonsiga:

Taageerada Apple ee internet-ka support.apple.com. Inta badan waxyaabaha uu ka kooban yahay Tababarkan Tilmaanta iPad-ku wuxuu ku saleysan yahay shaqada Taageerada Apple.

Magaalada Portland iyo Mashruuca CARES Act oo la taageeray iyada oo la adeegsanayo [Amarka Sanduuqyada Dhaqaale ee Gargaarka ee Degaanka ee CARES Act](#), oo uu oggolaaday Golaha Magaalada Portland kaasi oo jawaab u ah saameynta COVID-19 u leeyahay bulshada safka hore ku jirta. Dhaqaalahan ayaa lagu bixiyay iPad-yada, tiknoolajiyada la adeegsado, qaybinta, iyo tababarka boqolaal dadka reer Oregon ah. Mahad gaar ah waxaa iska leh Kooxda Shaqada ee Kala qaybsanaanta Dhanka Dhijitalka iyo dadaaladooda oo dhan.

Noofambar 2020